Axkaamta Yowmu Caashuuraa

Friday, December 25, 2009

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahaad Oo Dhan Allaah Ayaa Iska Leh iyo Nabigeena Suubanaay Salalaahu Caleyhi Wasalam Kii Ugu Sharafta Badnaay Anbiyada Cs isaga& Ehelkiisa & Asxaabtiisa Dhamaantoon

Saad Lasocotaan waxaan ku jirnaa bishii muxaram waxayna leedahay fadli tiro badan oo aad u weeyn waxaa nagu haboon inaan ka deeqtoono bishaan muxaram furasdaha ku jira.
Bisha rasuulkeena s.c.w wuxuu ahaan jirey mid badsha(Badiya) inuu soomo(Ramadaan) Sida ka sugnaatey rasuulkeena s.c.w Xadiiskii Abii Hureyra allaha ka raali noqdo(RT) wuxuu yiri : Wuxuu yiri Rasuulka s.c.w << Soon Midka Ugu Fadli Badan Bisha Ramadaan Kadib Waa Bisha Alle Ee Muxaram ,Salaadna Mida Ugu Fadli Badan Waa Salaatul -Leyl >> Imaam Muslin wariyey.

** Wuxuu yiri Ibnu Qaasim Bisha soon ugu fadli badan(Bacdu) ramadaanka kadib waa bishaan muxaram salaad waajibna waxaa ugu fadli badan salaatullayl.

قال ابن قاسم: "أي أفضل شهر تطوع به كاملاً بعد شهر رمضان شهر الله المحرم؛ لأن بعض التطوع قد يكون أفضل من أيامه كعرفة وعشر ذي الحجة، فالتطوع المطلق أفضله المحرم، كما أن أفضل الصلاة بعد المكتوبة قيام الليل

Faa"idooyinka Yoowmu Caashuuraa(10 Maalmood Bisha Muxaram Lasoomo)

Faaidooyin badan ayaa ku jira soonka lasoomo yoowmu caashuuuraa.

Abii Qataadah Al - Ansaariya allaha ka raali noqdo(RT) wuxuu yiri **<<Rasuulka s.c.w Waxaa La Weydiiyeey Soonka Maalinta Caashuuraha (Maalinta 10"naad eeBisha Muxaram) Wuxuu yiri Rasuulka s.c.w Inaan Ilaahay Ka Ajar Dalbado In Sanadkii**

Hore(Sanadkii tagey) La iigu Danbi Dhaafo >> Imaam Muslin wariyey.

Cabdulaahi Ibnu Cabaas allaha ka raali noqdo Isaga & Aaabihiis (RT) wuxuu yiri **<< Maan Arag Nabiga s.c.w oo Aad ugu Dadaalaayo Soonka Lasoomo Maalinta Caashuraha yacnii (Maalinta 10"naad eeBisha Muxaram) >>** Mutafiqun Caleyhi (**Bukhaari $ Muslim**). **وعن ابن عباس رضي الله عنهما قال: ما رأيت النبي _صلى الله عليه وسلم_ يتحرى صيام يوم فضَّله على غيره إلا هذا اليوم يوم عاشوراء، وهذا الشهر يعني شهر رمضان . متفق عليه**

Darajooyinka (Martabada) Oo Uu Leeyahay In Yoowmu Caashuura.

وصيام يوم عاشوراء له مراتب

Marka Kowaad :In Lasoomo Maalinta 9 "aad (Sagaalaad) iyo Maalinta **10"naad eeBisha Muxaram**

أولاً: صيام اليوم التاسع واليوم العاشر

عَنْ أبي قتَادَةَ الْأَنْصَارِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ

في صيام يوم عاشوراء أحتسب على الله أن يكفر السنة التي قبله ، ولحديث ابن عباس عند مسلم أيضاً لئن بقيت إلى قابل لأصومن التاسع والعاشر

Taasaa ah Darajada ugu fadliga badan sababatoo ah Cabdulaahi Ibnu Cabaas allaha ka raali noqdo Isaga $ Aaabihiis Rasuulka Wuxuu yiri Rasuulka s.c.w **<<** Hadaan Sii Noolaado (Ajashayda Wax ka Laabaantahay) Waan Soomi Doonaa Sanadka Soo Socda Laakiin Rasuulkii Waa Geeriyoodey oo Masoomin **>>**.Imaam Muslin wariyey.

Marka Labaad : In Qofka Soomo Maalinta 10"naad Bisha Muxaram iyo Maalinta 11"naad Bisha Muxaram Cabdulaahi Ibnu Cabaas allaha ka raali noqdo Isaga $ Aaabihiis Rasuulka Wuxuu yiri Rasuulka s.c.w **<<** Khilaafa Yuhuuda iyo Nasaarada (Gaalada Kiristaanka) Ee Sooma Maalin Ka horeysa Yoowmu Caashuura Ama Maalin Ka DanbeysaYoowmu Caashuura **>>**.Imaam Axmed

iyo Ibnu Khuzeymah wariyey.

ثانياً: صيام اليوم العاشر والحادي عشر؛

لحديث ابن عباس رضي الله عنهما، أن النبي صلى الله عليه وسلم قال: " خالفوا اليهود صوموا يوماً قبله أو يوماً بعده. أخرجه أحمد وابن خزيمة

Marka Sadexaad :In Qofka Soomo Maalinta 9 "aad (Sagaalaad) iyo Maalinta 10"naad Bisha Muxaram iyo Maalinta 11"naad Dalliishana Waa Xadiiska Cabdulaahi Ibnu Cabaas Marfuucan (Lookoryeelay) **<<** Ee Sooma Maalin Ka horeysa Ama Maalin Ka Danbeysa **>>**Imaam Axmed wariyey

ثالثاً: صيام اليوم التاسع والعاشر والحادي عشر؛

لحديث ابن عباس مرفوعاً " صوموا يوماً قبله ويوماً بعده

Marka Afaraad : In Qofka Muslinka Maalinta (yoowmu Caashuura) Kaliya Soomo Bisha Muxaram Daliilkana Waa Xadiiska Abii Saciid Alkhudriye (RT allaha ka raali noqdo) Rasuulka s.c.w Wuxuu yiri **<<** Adoon Adoomadda Ka Mid ah Ma Jiro Ee Maalin Ilaahay Dartiisa U Sooma , ilaahay Wuxuu Wajigiisa Ka Fogeeya Naarta Todobaatan (70 dayrood) Sano **>>**.Mutafiqun Caleyhi (**Bukhaari $ Muslim**).

رابعاً: إفراد العاشر بالصيام ؛

لحديث أبي قتادة عند مسلم " أن النبي صلى الله عليه وسلم قال في صيام يوم عاشورا: أحتسب على الله أن يكفر السنة التي قبله

Faadidooyinka Yoowmu Caashuuraa oo Kooban:

قال ابن كثير في تفسير هذه الآية:

أي حاسبوا أنفسكم قبل أن تحاسبوا، "

وانظروا ماذا ادخرتم لأنفسكم من الأعمال الصالحة ليوم معادكم وعرضكم على ربكم".

Ibnu Kathiir Wuxuu Yiri Naftiina Xisaaba inteydan La Idin Xisaabin Naftiina Waxa Aad Usoo bandhigtaan Camalada Wanaagsan Si aad Rabigiina Aad Ula kulantaan

قدم رسول الله المدينة فوجد اليهود صياماً يوم عاشوراء، :وفي الصحيحين عن ابن عباس قال
قالوا :«ما هذا اليوم الذي تصومونه» :فقال لهم رسول الله

هذا يوم عظيم أنجى الله فيه موسى وقومه، وأغرق فرعون وقومه، فصامه موسى شكراً لله فنحن
نصومه، فقال :«فنحن أحق وأولى بموسى منكم»

فصامه رسول الله وأمر بصيامه.

Cabdulaahi Ibnu Cabaas allaha ka raali noqdo Isaga $ Aabihiis Rasuulka Rasuulka s.c.w << Ayaa Yimid Magaalada Madiinah Markaas Ayuu Arkey Yuhuudii Deganayd Magaalada Madiinah Oo Soomayaan Maalinta Caashuuraha Rasuulka Wuxuu yiri Rasuulka s.c.w <Soonkaad Aaad Soomaysaan > Markaasey Yiraahdeen Yuhuudii Waa Malin (Weeyneyn) waa Maalintii Muuse Cs & Qoomkiisa Labadbaadshey, Fircoonah & Qoomkisa La Halaagey Waxaana soomay Muusa Cs Shukrin Oo Ku Shukrinaayo Alaah ,Rasuulka Rasuulka s.c.w Waa uu Soomay Wuxuuna Amray Saxaabadda In ay Soomaan Wuxuuna Yiri Annaga Idiinkaga Xaqleh Muusa Cs

1-Dar allle oo aad u soonto waxaad helaysaa ilaahay raali ahaanshahiisa iyo wajigaada naarta laga fogeeya maalinta qiyaamaha .

2- Soonka la soomo maalinta caashuuraha waa sunnadii nabigaada suubanaay aad raacdey oo aad soo nooleysey.

3-Soonka lasoomaayo bisha muxaram waxay katimid billaha alaah agtiisa fadliga ku leh.

4- Soonka qofka wuxuu gaashaan u noqonayaa oo uu macaasida iyo xumaanta kaga gaashaanto inshalaah.

5-Maalinta 9ka muxarim lasooma waa khilaaf yuhuuda iyo Nasaarada la khilaafo maadaama hadyigii rasuulka ahaay inuu Gaalada Khilaafo.
6-Ujeeda Loo Soomaayo Waa maalintii Fircoon lahalaagey muusa cs labad baadshey.

Ilaahaan Uga Mahad Celin Oo Ii Fududeeyey In Risaaladaan oo i Waafijiyey aan Walaalada Ugu Bedelo Luuqadda Af Soomaliga Muslimiinta Ku Hadlaan Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni Allaah iyo Rasuulkeena S.c.w Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U Baahanahay Yaan La iga Iloobin.

Waxaa Tarjumay Walaalkiin **Cabdiladhiif Aadan**
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

هذا والله والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم زبير_١